

Nofeembar 4, 2024

## Ardayga sannadka afaraad ee Dugsiga Sare Lakeside ayaa ka Tagay Olooleeyaha Xeerka Labiska una gudbay La taliyaha Gobolka

Markii 2024-2025 [Gollaha La talinta Ardayga Gobolka](#) isugu imaadaan markii ugu horeysay gudaha Nofeembar, ardayga sannadka afaraad Anna Katz ee Dugsiga Sare Lakeside ayaa ka mid noqonayo codadka qaabeynaya mustaqbalka waxbarashada Georgia. Waxaa loo doortay sida mid ka mid ah 74 arday kaliya ee gobolkoo dhan Kormeeraha guud ee Dugsiga Gobolka Richard Woods, Anna ma matali doonto dugsigeeda oo keliya balse sidoo kale dhammaan Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) ee gollaha sanadkaan.

"Aad ayaan ugu faraxsanahay," Anna ayaa dib u xasuuusatay markii ay ogaatay balanteeda. "Waxaan markiiba bilaabay inaan ka fikaro mawduucyada aan rabay inaan keeno kulamada."

Jaceylka Anna ay u qabto u doodista ayaa xididay inta lagu jiray sannadkeedii labaad markii ay ka bixisay jawaab celin xeerka labiska DCSD. Iyadoo aqoonsaneysa in xeerarka jiray uusan muujin caadooyinka bulshada casriga ah, way hadashay—tallaabo muhiim u aheyd degmada taasoo dib u eegeso xeerka si markaas si fiican loogu ixtiraamo si shaqsi ah iyadoo la joogteynayo xoog saarista fayo qabka.

"Waayo aragnimadaas waxay i ogeysiisay sida saameynta leh ee ay tahay in la yeesho helitaanka go'aan gaarayaasha," Anna ayaa tiri. "Aad bay u fududahay in loo dodo isBADel markii aad si toos ah ula xiriiri kartid kuwaas isbadelka. Ku soo biirista Gollaha La talinta Ardayga ayaa u muuqdo sida fursad ku haboon ee matasho codadka ardayda heerka gobol."

Kormeeraha guud Woods ayaa u muujiiyay xamaasad xubnaha cusub ee gollaha.

"Hogaamiyayaashaan da'da yar waxay matalaan mustaqbalka Georgia, iyo codkooda waa muhiim inagoo sii wadeyno qaabeynta jiheynta waxbarashada gobolkeena," waxaa yiri kormeeraha guud Woods.. "Waxaan rajeynayaa inaan maqlo fikradahooda, ra'yigooda, iyo aragtiyada inagoo ka wada shaqeyneyno si aan u hubino in arday walba uu leeyahay fursada lagu guuleysto."

Gollaha La talinta Ardayga Gobolka, waxaa abuuray Waaxda Waxbarashada Georgia, ayaa ka qeybgeliso ardayda xeerka dajinta. Gollaha wuxuu hubiyyaa xeerarka waxbarashada inay muujiso waaya aragnimadooda iyadoo la mideynayo ardayda kala duwan ee gobolkoo dhan. Xubnaha waxaa loo xushaa hogaamintooda, adeegooda bulshada, iyo guulaha waxbarashada.

Gollaha wuxuu u adeegaa sida xiriirkha muhiimka ah ee u dhaxeeyo ardayda iyo saraakiisha waxbarashada gobolka. Inta lagu jiro sannadka, xubnaha waxay bixiyaan aragtiyo ku saabsan xeerarka gobolka, ka wada hadlaan arrimaha muhiimka ah ee waxbarashada, waxay matalaan dugsiyadooda, oo waxay ka qaybqaataan mashaariicda adeega bulshada ee Georgia oo dhan.

Maadaama ay tahay wakiilka kaliya ee DCSD iyo mid ka mid ah dhowrka ka socdo metro Atlanta, Anna waxay si aad ah ula socotaa kala duwanaanshaha dadyowga ardayda ay matasho oo waxaa ka go'an inay kordhiso aragtiyo badan oo kala duwan.

"Waxaan ahay arday dumar ah iyo Yuhuudi, marka waxaan ka wadaagi karaa aragtiyadaas, ayay tiri. "Laakiin waan si buuxdo ayaa u fahamsannahay waaya aragnimada dadka Hisbaaniga, Madowga, ama ardayda ragga. Tan waxay igula tartaa inaan si firfircoo u dhageysto oo aan u keeno walaacyadooda safka hore inta aan ku jiro kulamadeena."

Mid ka mid ah arimaha ugu muhiimsan ee ay qorsheyneyo Anna ayaa ah sinnaan la'aanta edbinta ee dugsiyada. Sida ardayga diiwaangelinta labada ah ee Georgia Tech, waxay si qoto dheer ah isugu tuureysaa mowduuca iyadoo u mareysa mashruuca fasalka xeerka dadweynaha ee diiradda saaraya kala duwanaanshaha edbinta dugsiga oO Dugsiyada Dadweynaha Atlanta. La kaashiga xubinta guddiga dugsiga, waxay baareysaa sida ardayda Madowga ah loogu edbiyo heerarka aadka u sareeya marka la barbardhigo jaalalkooda Cadaanka ah.

"Shayga koowaad ee aan rabo in aan kala shaqeeyo gollaha ayaa ah sida loo yareeyo farqiga edbintaas oo loo hubiyo in dhammaan ardayda ay dugsiga ku jiraan, "Anna ayaa tiri. "Iyo wax ka qabashada heerarka dugsi ka bixitaanka ee sababto edbinta dugsiga."

Marka laga soo tago dadaaladeeda u doodista, Anna waa hogamiye firfircoo oo ka tirsan bulshada dugsigeeda. Waxay u adeegtaa sida madaxweynaha Ururka Ardayda Yahuuda iyo madaxweyne ku xigreenka kooxda Mock Trial. Iyadoo leh hamiga ah inay noqoto qareenka xuquuqaha rayidka, waxay doorkeeda gollaha u aragtaa inay tahay dhagax jaranjaro ku aadan saameynta balaaran ee bulshada.

""Waxaan rajeynayaa inaan matalo dhammaan ardayda DeKalb," ayay tiri. "Waxaan rajeynayaa inaan cadaalad noo sameyno oo aan hogamiyo isbadelo fiican oo uu qof walba ka faa'idayo."

XXX